Xuquuqda Waalidka

Adeegyada Afcelinat iyo Turjumaanidda

Dhammaan waalidiinta waxay xaq u leeyihiin inay ku helaan macluumaadka waxbarashada carruurtooda luqad ay fahmi karaan. Markii cunugaaga lagu qoro dugsiga, dugsigu waxuu ku weydiin doona luqadda aad doonayso inaad isticmaasho marka aad la xaajoonayso dugsiga. Taasi waxay ka caawini doonta dugsigu inuu garto baahidaada luqadeed si ay kugu diyaariyaan turjubaan ama ay kugu soo turjumaan dokumeentiga, iyagoo bilaash ah.

Waxa aad ka filan karto dugsiga iyo degmo dugsiyeedka

Waxaad qeyb muhiim ah ka tahay waxbarashada cunugaaga!
Dugsigu waxa uu kugula hadli doona—luqaddaada—wixii ku saabsan waxbarashada cunugaaga. Taas waxaa badanaa ka mid ah turjubaanka dokumeentiga iyo afceliyaha luqadda ee shirarka iyo wada sheekaysiga.

Waxaad xaq u leedahay adeegyadaas xataa haddii aad xoogaa Ingiriis ah ku hadasho iyo xataa haddii cunugaagu ku hadlo oo qoro luqadda Ingriiska.

Dugsigu waxa uu kugula soo xariirin doona **luqaddaada** wixii macluumaad muhiim ah iyo fursadaha cunugaaga. Taas waxa ka mid ah macluumaadka ku saabsan:

- Diiwaangelinta iyo isqoridda dugsiga
- Darajada, heerka aqoonta, iyo qalinjibinta
- Sharciyada dugsiga iyo edaabta ardayga
- Imaanshada, maqnaashada iyo ka saaritaanka
- Fasaxa waalidka ee adeegyada ama barnaamijyada
- Caafimaadka, ammaanka, iyo xaaladaha degdegga
- Xiritaanka dugsiga
- Fursadaha lagu heli karo barnaamijyada iyo adeegyada—ay ka mid yihiin aqoonta sare, ku meelaynta hore, iyo Barnaamijyada barashada luqadda Ingriiska
- Waxbarashada qaaska ah iyo adeegyada ardayda curyaaminta ah

Shirarka iyo wada hadalka macalimiinta iyo shaqaalaha dugsiga
Markii aad la hadasho macalimiinta ama shaqaalaha dugsiga, dugsigu waxa uu ku siin doona turjumaan haddii aad u baahan tahay mid. Taas waxaa ku jira shirarka macalinka iyo waalidka, shirarka ku saabsan waxbarashada khaaska, ama wixii kale ee ka wada hadal ah ee ku saabsan waxbarashada cunugaaga.

Dugsigu waxa uu isticmaali doona oo kaliya turjubaano aqoon leh oo si fiican u yaqaanna Ingriiska iyo luqaddaada. Dugsigu wuxuu hubin doona inay turjubaanadu fahmaan eray kasta ama fikradaha la isticmaali doono inta lagu guda jiro kulanka. Dugsigu uma isticmaali doono ardayda ama carruurta turjumaan ahaan.

Turjumaanku waa inuu ahaado mid dhexdhexaad ah oo uu sheega wax kasta oo lagu hadlo inta uu kulanku socdo. Waa inaysan waxba ka reebin ama ku darin waxa ruux kasta sheego. Dugsigu waxa uu hubin doona inay turjubaanadu fahmaan doorkooda oo ay macluumaadka u hayaan si qarsoodi ah. Turjumaanku waxa uu noqon karaa shaqsi ahaan ama mid telefoonka iyo waxa uu noqon kara shaqaalaha dugsiga ama qandaraasle dibada ka ah.

Dugsigu wuxuu bixin doonaa turjubaan shirarka iyo wada hadalka kasta oo dugsiga ama ku saabsan waxbarashada ilmahaaga. Waxaad sido kale weyddiisan karta dugsiga haddii aad mid u baahan tahay.

Macluumaadka qoraalka
Dugsigu waxa uu u turjumi doonaa macluumaadka qoraalka ee muhiimka ah luqadaha ugu badan ee degmadaada dugsiga looga hadlo. Haddii aad hesho macluumaad aan luqadda afkaaga ahayn, fadlan u soo sheeg dugsiga haddii aad jeclaan lahayd in ay ku soo tarjuman qoraal ahaan ama kugu sharaxaan oraah ahaan luqaddaada.

Haddii aad su'aalo ama welwel qabto? U baahan tahay gargaar?

Haddii aad qabto su'aalo ama aad jeclaan lahayd inaad turjumaan codsato ama qoraal la turjimanayo, dugsigagu waa ku caawini kara. Waxaad caawinaada weydiisan karta qof kasta oo dugsiga, ama waxaad weydiisan karta xubin shaqaalah:

- Paula Ogbevoen, pogbevoen@lwsd.org, 425-936-1399

Soo sheegitaanka welwelka ama cabashooyinka

Kuwaan waa xaquuqahaada!
Sida ay dhigayaan xeerarka federaalka ee xuquuqda madaniga iyo kuwa gobolka, waxaad xaq u leedahay in aad hesho macluumaad luqaddaada ku qoran.

Weydii xafiiska weyn ee dugsiga nuqul ah siyaasadda iyo nidaamka luqadaha ee degmada. Waxaad sidoo kale ka heli karta online-ka: https://www.lwsd.org/about-us/policy-and-regulations/personnel-5000/nondiscrimination-and-affirmative-action-5010

Welwelka iyo cabashooyinka
Haddii aad qabto wax welwel ah oo ku saabsan adeegyada fasiraadda ama turjumaadda dugsiga—ama haddii aan lagu siin fasiraadda ama turjumidda aad u baahan yahay—waxaad leedahay dhowr fursadood.

1. **La hadal maamulaha dugsiga ama qof shaqaalaha ah oo ku fudud.** La hadalka maamulaha dugsiga ayaa ah inta badan tallaabada ugu fiican ee marka hore la qaado si wax looga qabto waxa aad saluugsan tahay. U sharax waxa dhacay, oo u sheeg maamulaha waxa uu sameyn karo si ay uga caawiyaan xallinta dhibaatada.

2. **La hadal degmo dugsiyeedkaaga.** Waxaad sido kale la xariir karta degmo dugsiyeedkaaga si aad ula wadaagto waxa aad ka tabanayso. Waxaad wici kartaa iskuduwaha arrimaha xuquuqda madaniga ama kormeeraha xafiiska degmada.

3. **Weydiiso gargaar lagu xalliyo waxyaabaha aad tabanayso.** Waxa kale oo aad kala xidhiidhi kartaa hay'adahaan wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada ama gargaar si loo xaliyo waxa aad ka tabanayso.

Equity and Civil Rights Office
Office of Superintendent of Public Instruction
360-725-6162 | www.k12.wa.us/equity

Office of the Education Ombuds
1-866-297-2597 | oeo.wa.gov

4. **Waxaad soo gudbin kartaa cabasho.** Si aad u soo gudbisid cabasho, ku soo sharax wixii dhacay si qoraal ah—luqaday doonto ha ahaatee—oo ugu soo dir degmada boostada, email, ama gacan ugu keen. Hubso inaad adiguna koobiyo ka haysato diiwaan ahaan.

   30 casho oo shaqo gudahood, degmadu waxay baaritaan ku sameyn doonaan cabashadaada oo kuugu soo jawaabi doonaan qoraal ahaan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha cabashada waxay ku yaallin online-ka halkan ah: www.k12.wa.us/Equity/Complaints.aspx.

Fadlan ogsoonoow in iskuulka aanay adiga ama ilmahaaga ka aargoosan karin dacwada ama cabashada aad ka xareeyseen daraadeed.